# Su'aalaha iyo jawaabaha ku saabsan cusboonaysiinta OHP iyo dheefaha kale ee Medicaid

KEEP COVERED
Ilaasho faa'idooyinkaaga caafimaadka!

Dib-u-cusbooneysiinta qorshaha kaarka caafimaadka lagu magacaabo Oregon Health Plan (OHP) iyo macaashyada/dheefaha kale ee Medicaid ayaa hadda bilaabatay. Qaad tallaabo aad u ilaashato dheefahaaga caafimaadka

1. Haddii cinwaankaaga guriga wax iska badaleen nala soo socodsii si aan kuula soo socodsiino macluumaad muhiim ah. Si iskaa ah ayaad taas u samayn kartaa ama waxaad heli kartaa caawinaad arrintaasi ku aadan qaab online ah, taleefan ama si shaqsi ah.
2. Kadib, Inta badan boostadaada ka fiiri waraaqaha ay kuusoo diraan gobolka Oregon. Markay kusoo gaaraan waraaqaha dib u cusboonaysiintu, isla markiiba samee waxyaabaha ku qoran.

Haddii aad qabto su'aal aan halkan looga jawaabin, **waxaad caawinaad bilaash ah ku heli kartaa luqado badan:**

- Hel xafiis ama bahwadaag qaabbilsan arrimaha bulshada ee kuugu dhow. KeepCovered.Oregon.gov.
- Na soo wac maalmaha shaqo laga bilaabo 7 subaxnimo ilaa 6 galabnimo **(833) 722-9156**. Dhammaan wicitaanada gudbinta waa la aqbalaa.



# Su’aalo ku saabsan waxa aad u baahan tahay inaad hadda samayso

## 1. Waa maxay sababta aan ugu baahanahay inaan dib u cusboonaysiiyo OHP ama dheefaha kale ee Medicaid haddii aanan samayn sidaa saddexdii sano ee la soo dhaafay?

- Xeerarka “Xaaladda Degdeg ah ee Caafimaadka Dadweynaha” ee la meel mariyey inta lagu guda jiray masiibada COVID-19 ayaa Meesha laga saaray.    Hadda, gobolka Oregon waa inuu hubiyaa in qof kastaa weli u qalmo OHP iyo dheefaha kale ee Medicaid.

## 2. Waa maxay waxa ugu muhiimsan ee aan samayn karo si aan u ilaashado dheefahayga?

- Waxa ugu muhiimsan ee aad samayn karto waa in aad cusboonaysiiso macluumaadkaaga xiriirka sida ugu dhakhsaha badan.
    - Fiiri sanduuqa bogga 1aad  si aad u hesho caawimo bilaash ah ee  luuqadaha badan.
    - Waxaad sidoo kale macluumaadkaa lagaala soo xiriiri karo ku cusboonaysiin kartaa qaab online ah adigoo booqanaaya benefits.oregon.gov. Samayso ama gal akoonkaaga onlaynka ah ee ONE.
- Kadibna, inta badan boostadaada ka hubi waraaqaha ay kuusoo diraan gobolka Oregon. Markay ku soo gaaraan waraaqaha dib u cusboonaysiintu, isla markiiba samee waxyaabaha ku qoran. Haddii aad u baahan tahay caawimo, eeg sanduuqa bogga 1aad.

## 3. Yaa u baahan inuu qaado tallaabo si uu u sii haysto dheefahiisa caafimaad?

Haddii aad hesho mid ka mid ah taageerada hoos ku taxan, waxaad u baahan tahay inaad cusboonaysiiso macluumaadkaaga xiriirka oo aad la socoto waraaqaha gobolka kaaga imaanaaya:

- Oregon Health Plan (OHP)
- Medicaid kale sida:
    - Medicare Savings Programs
    - Adeegyada muddada dheer iyo taageerada dadka naafada ah iyo dadka waaweyn. Tan waxa ku jiri kara ka caawinta hawl-maalmeedka ee guriga ama xarunta dhexdeeda.

## 4. Goormaan heli doonaa waraaqahayga?

- Waraaqaha waxa la soo diri doonaa hadda ilaa badhtamaha 2024 Dhammaan dadka isku mar looma cusboonaysiin doono, markaa ka hubi boostadaada inta badan waraaqaha gobolka.
- Ma leedahay akoon onlayn ah ee ONE? Halkaa waxaad ku arki kartaa taariikhda cusboonaysiinta ee la qiyaasay. Waxa aanu gelin doonaa koobi dijitaal ah oo waraaqahaaga ah xarunta fariinta kadib marka aanu kuu soo dirno. Waxa kale oo aad isku qori kartaa si aad u hesho ogaysiisyada qoraalka ama iimaylka marka waraaqahaaga la soo diro. Booqo [benefits.oregon.gov](benefits.oregon.gov) si aad u Samaysato ama u gasho koontadaada onlaynka ah ee ONE.
- Waxa kale oo aad booqan kartaa ama wici kartaa xafiis ama kuwa aan bahwadaagta nahay, ama wac xarunta adeegga macaamiisha ee ONE oo weydii inay eegaan marka waraaqahaaga la soo diri doono Eeg sanduuqa bogga 1aad.

## 5. Immisa warqad ayaan heli doonaa?

- Dadka qaarkiis waxay heli doonaan hal warqad oo u sheegaya in dheefahoodu sii socon doonaan iyo in kale. Waxay kuu sheegi doontaa inaad u baahan tahay inaad ka jawaabto warqadda iyo in kale.
- Dadka qaar ayaa laga yaabaa inay helaan laba warqad isku mar. Hal warqad ayaa ku ogeysiin doonta in laguu cusboonaysiiyay iyo inaad u baahan tahay inaad soo dirto macluumaad dheeraad ah. Warqadda kale waxaa ku qoran macluumaadka aad u baahantahay in aad soo dirto iyo sida aad ku soo dirayso.
- Haddii aad u baahan tahay inaad ka jawaabto ama aad u dirto macluumaadka, waxaad haysan doontaa 90 maalmood. Inta lagu jiro wakhtigaas, waxaanu sii wadi doonaa dirida waraaqaha xasuusinta bishiiba mar.

## 6. Maxaa warqadaha ku qornaan doono?

Waxaad heli doontaa waraaqo dib-u-cusboonaysiin iyo warbixinnada kooban ee la xiriira kiisaska, kuwaasoo sharraxaya dheefahaaga. Si taxadar leh u akhri, oo nala soo xiriir haddii aad u baahan tahay caawimaad si aad u fahamto—eeg sanduuqa bogga 1aad si aad u hesho caawimo. Warqadahaagu waxay kuu sheegi karaan waxyaabo ay ka mid yihiin:

- **In si toos ah dib loo cusbooneysiiyay macaashka/dheefaha qorshaha caafimaadka ee OHP ama macaashyada kale ee Medicaid.** Dib-u-eeg macluumaadka si aad u hubiso in wax walba ay sax yihiin. Hubi inaad ka jawaabto haddii ay jiraan wax isbeddello ah.
- **Waxaad u baahantahay in aad noo soo dirto macluumaad dheeraad ah si ogaano inaad weli u qalanto.** Waxaa laga yaabaa in laguu sheego inaad soo dirto macluumaad ama wareysi lagula yeesho. Waxaad haystaa ilaa 90 maalmood in aad uga soo jawaabto dalabkeena Waraaquhu waxay kuu sharrixi doonaan waxyaabaha ay tahay inaad samayso.
- **Dheefaha way isbedelayaan.** Haddii aad u qalanto barnaamij caafimaad oo kale ama aadan u qalmin OHP ama Medicaid kale. Waxaad heli doontaa ugu yaraan 60 maalmood oo ogaysiis ah oo ku saabsan marka dheefahaaga Caafimaad la jooijin doono. Waraaqaha waxay kuu sheegi doonaan waxyaabaha ay tahay inaad samayso marka xigta. Haddii xaaladaadu isbedeshay oo aad u malaynayso inaad weli xaq u leedahay, la xiriir shaqaale ka hor intaanay dhammaan dheefahaaga.

## 7. Qof kasta oo qoyskayga ka mid ah ma heli doonaa warqado iyo guudmarka kiiska?

- Qoysaska intooda badan waxay heli doonaan hal warqad iyo guudmarka kiiska ee qoyska. Xaaladaha qaarkood, dadku waxay heli doonaan waraaqo xubnaha qoyska kala duwan waqtiyo kala duwan.
- Waa muhiim in qof kasta oo qoyskaaga ka tirsan uu cusboonaysiiyo macluumaadka xiriirka.

## 8. Maxaa dhacaya haddii aanan ka jawaabin warqadaha?

- Xitaa haddii aad weli u qalanto OHP ama Medicaid kale, waxaad waayi kartaa caymiskaaga haddii aadan ka jawaabin waraaqaha.
- Haddii aanad ka jawaabin waraaqaha oo aad ogaato in aad lumisay dheefahaagii, mar kale ayaad codsan kartaa. Haddii aad weli u qalanto, waxaan dib u furi karnaa dheefahaaga 90 maalmood gudahood.

9. **Maxaa dhacaya haddii aan qorsheynayo inaan guuro ama beddelo cinwaanka boostada dhawaan?**
   - Hubi inaad cusboonaysiiso macluumaadkaaga xiriirka isla marka aad guurto ama badasho ciwaanka boostada. Waxaad sidaa ka samayn kartaa [benefits.oregon.gov](benefits.oregon.gov). Samee ama gal akoonkaaga onlaynka ah ee ONE.
   - Fiiri sanduuqa bogga 1aad si aad u hesho caawimo bilaash ah oo xagga luuqadaha ah, si aad u cusboonaysiiso ciwaankaaga.

10. **Ma haysto cinwaanka boostada joogtada ah. Sideen ku heli karaa warqadaheyga?**
   - Waxaad isticmaali kartaa ciwaan kasta oo aad ku heli karto warqadahaaga. Tani waxay noqon kartaa saaxiib, xubin qoyska ama urur la aamini karo.
   - Waxaa laga yaabaa inaad hesho Sanduuq Boosto oo bilaash ah. Tag Xafiis kasta ee Boostada Maraykanka ah oo u sheeg inaad guri la'aan tahay.  macluumaadka halkan ka hel: [faq.usps.com/s/article/Is-there-mail-service-for-the-homeless](faq.usps.com/s/article/Is-there-mail-service-for-the-homeless).

## Su'aalo ku saabsan waxa la sameeyo haddii dheefahaagu isbedelaan

11. **Maxaa dhacaya haddii dib dambe aniga ama xubin ka mid ah qoyskaaga ugu qalmi waayo qorshaha Oregon Health Plan (OHP) ama dheefaha kale ee Medicaid:**
   - **Waxaa laga yaabaa inaad u-qalanto Medicare.** Ka wac Social Security Administration lambarka 800-772-1213 si aad isaga diiwaangeliso telefoonka ama aad ballan uga qabsato xafiiska deegaanka maxalliga. Waxaad isku diiwaangelin kartaa Medicare adigoo adeegsanaya barta onlaynka ah ee cinwaankeedu yahay [ssa.gov/medicare/sign-up](ssa.gov/medicare/sign-up). Ama waxaad booqan kartaa barta ciwaankeedu yahay OregonHealthcare.gov/GetHelp to find si aad u hesho wakiil caymis ama qof kaa caawiya barnaamijka (Senior Health Insurance Benefit Assistance Program) oo aad ka wici karto 800-722-4134.
   - **Haddii aadan u-qalmin Medicare, hubi si aad u ogaato in loo-shaqeeyahaagu bixiyo qorshe la awoodi karo ee caymiska caafimaadka.** Hubso inaad la hadasho maamulahaaga ama waaxda shaqaalaha ka hor inta uusan kaa dhammaan qorshahaaga OHP. Waxaad heli doontaa waqti isdiiwaangelin oo gaar ah marka aad lumiso OHP-ga.
   - **Haddii aadan haysan Medicare ama qorshe shaqo-bixiye oo la awoodi karo, waxaa laga yaabaa inaad ka iibsan karto qorshe caafimaad suuqa Caymiska Caafimaadka Oregon.** Tani waxay ku kici kartaa wax dhan $1 bishii. Qorshayaashu ayaa daboolo waxyaabaha ay ka midka yihiin daawooyinka dhakhtarku qoro, booqashooyinka dhakhtarka, daryeelka degdegga ah, isbitaal dhigista, iyo wax kale oo badan. Dadka lumiyay/laga joojiyay OHP-ga waxay iska diiwaangelin karaan Marketplace ka hor inta uu joogsan OHP-gooda. Taariikhda kama dambaysta ah ee isdiiwaangelinta waa Luulyo 31, 2024.
     - Si aad wax badan uga barato Suuqa, booqo [OregonHealthCare.gov](OregonHealthCare.gov) ama wac 833-699-6850 (lacag-la'aan ah, dhammaan wicitaannada gudbinta waa la aqbalay).

   - Waxaad sidoo kale  booqan kartaa bahwadaagta qaabbilsan arrimaha bulshada ama wakiilka caymiska si aad uga hesho caawimaad bilaash ah Suuqa, caawimaad fool-ka-fool ah ama taleefan. Si aad u hesho midka kuugu dhow, fadlan booqo OregonHealthCare.gov/GetHelp.

## 12. Maxay yihiin sababaha aan ku waayi karo OHP ama Medicaid kale?

- Haddii uu dakhligaagu kor u kaco. Haddii aad kasbato in ka badan dakhliga ugu badan ee barnaamijka, uma sii qalmi doontid OHP ama Medicaid kale.
- Haddii aad beddeshay heerka xaraynta cashuurta.
- Haddii aad hadda leedahay Medicare. Waxaa laga yaabaa inaad weli u qalanto OHP ama dheefaha kale ee Medicaid.

## 13. Maxaa dhacaya haddii aan tago cisbitaalka ama dhakhtarka oo aan ogaado in aan Haysan OHP ama dheefaha Medicaid kale?

- Waxaa laga yaabaa inaad lumisay dheefaha maadaama aadan ka jawaabin waraaqahii aan kuu soo dirnay Fiiri warqadahaaga si aad u aragto taariikhda ay OHP-gaagu joogsanayso. Haddii taariikhdaas ay ahayd wax ka yar 90 maalmood ka hor, wali waad ka jawaabi kartaa oo dib ayaad u bilaabi kartaa dheefahaaga. Haddii aanad haysan waraaqahaaga, hel caawimo adigoo isticmaalaya sanduuqa bogga 1. Waxa kale oo aad dib u codsan kartaan wakhti kasta oo aad waydiisan kartaa in lagaa caawiyo bixinta biilasha caafimaadka ee dhawaanahan.
- Haddii aad lumisay OHP-gaga sababtuna tahay inaadan u sii qalmin, waxa laga yaabaa inaad qorshe cusub ka hesho Suuqa Caymiska Caafimaadka Oregon. Eeg su’aasha 11 si aad wax badan u ogaato.
- Haddii aad leedahay Medicare oo aad lumiso OHP ama Barnaamijka Keydka Medicare, waxaad la hadli kartaa wakiilka caymiska ama lataliyaha Caawinta Dheefaha Caymiska Caafimaadka Waayeelka si aad u fahamto ikhtiyaarkaaga Medicare. Waxaad booqan kartaa OregonHealthcare.gov/GetHelp.

## 14. Maxaa dhacaya haddii aan u malaynayo in taleefoon ama fariin qoraal ah ee ku weydiinaya macluumaadka yahay mid khiyaano ah?  Sideen ku hubsan karaa inay dhab ahaantii OHP tahay ama soo waco rasmi ah?

- Oregon Health Authority, Oregon Department of Human Services, iyo Hay’adaha Daryeelka Isku-dubbaridan ayaa laga yaabaa inay qoraal u soo diraan oo ay wacaan xubnaha si ay u xasuusiyaan inay cusboonaysiiyaan macluumaadkooda ama ay ku cusboonaysiiyaan wakhtigooda.
- Marna ku soo wici mayno in aan ku waydiino lacag aad isku diwaangeliso ama dib-u-diiwaangeliso. Weligaa ha la wadaagin macluumaadka bangiga ama kaarka deynta qof kasta oo sheeganaya inuu ka socdo Oregon Health Authority, Oregon Department of Human Services, Oregon Health Plan, ama Medicaid.
- Haddii lagugu soo waco telefoon ama fariin qoraal ah oo aad u malaynayso inay tahay khiyaano, ku dami oo ha ka jawaabin wicitaankooda.

# Su’aalaha ku saabsan OHP iyo Medicare

## 15. Maxaa dhacaya haddii aan dhawaan bilaabay Medicare?

- Dadka haystay OHP ka dibna bilaabay Medicare intii uu cudurku socday waxa ay sii haysanayaan OHP. Waxaan ugu yeernaa tan dheefaha “laba-geesoodka buuxa” sababtoo ah waxaad haysataa Medicare iyo OHP.
- Qof kastaa wuxuu u baahan yahay inuu cusbooneysiiyo. Dad badan ayaa u baahan doona in waraysi la yeeshaan shaqaale si ay u ogaadaan nooca dheefaha ay u qalmi karaan. Waxa laga yaabaa in aad caawimo ka hesho bixinta khidmadaha Medicare Qaybta B, Daboolida labaad, ama sii socoshada daboolida laba-geesoodka ah, oo ay ku jiraan gaadiidka ilkaha iyo kuwa aan xaaladda degdegga ahayn.
- Haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo hawlaha maalinlaha ah ee guriga ama xarunta, weydii adeegyada iyo taageerada daryeelka muddada-dheer.
- Haddii aad lumiso dheefaha OHP, waxaad kala hadli kartaa wakiilka caymiska ama lataliyaha Dheefaha Caymiska Caafimaadka ee Waayeelada (SHIBA) wixii ku saabsan doorashadaada Medicare. Ka hel mid OregonHealthcare.gov/GetHelp ama wac SHIBA 800-722-4134.

## 16. Maxaa dhacaya haddii aan 65 jirsado balse aanan iska diiwaan gelin Medicare?

- Haddii aad 65 jirsatay intii lagu jiray cudurka faafa, laakiin aadan iska qorin Medicare wakhtigaas, isla markaaba is diiwaangeli. Eeg jawaabta koowaad ee su’aasha 12 si aad u ogaato taas sidii ay ku dhacday
- Waa muhiim inaad iska diiwaan geliso caymiska Medicare inta lagu jiro xilliga isdiiwaangelinta hore. Tani waxay socotaa todoba bilood, laga bilaabo saddex bilood ka hor intaadan gaarin 65. Waxa kale oo aad isku qori kartaa 6 bilood gudahood marka OHP-adu dhammaato. Haddii aadan isku qorin, waxaa laga yaabaa inaad bixiso lacag dheeraad ah, oo loo yaqaan ganaaxa diiwaangelinta-daahday haddii aad go’aansato inaad mar dambe isku qorto.
- Haddii aad leedahay caymis caafimaad oo kale (sida shaqadaada), ama aad u qalanto Barnaamijka Kaydinta Medicare, waxaa laga yaabaa inaadan bixin ganaax. Fadlan ka hubi Medicare si aad u hubiso. Wax badan ka ogow medicare.gov/basics/costs/medicare-costs/avoid-penalties.

# Su’aalaha ku saabsan OHP iyo adeegyada daryeelka muddada-dheer

## 17. Tani miyay aniga i khusaysaa haddii aan helo daryeelka muddada-dheer?

- Haa Haddii aad hesho adeegyada daryeelka muddada-dheer ee Medicaid, waxaad u baahan doontaa inaad dib u cusboonaysiiso dheefahaaga caafimaad.
- Daryeelka muddada dheer ee Medicaid waxaa ka mid ah adeegyada caawiya dadka qaba caafimaadka jireed, maskaxeed, iyo garaadka ama naafonimada korriinka. Adeegyadu waxay dadka ka caawiyaan inay daryeelaan caafimaadka maalinlaha ah iyo baahiyaha daryeelka shakhsiyeed ee aanay iskood u samayn karin.
- Adeegyada waxaa lagu bixin karaa guriga ama bulshada qofka. Waxa kale oo lagu bixin karaa goob daryeel sida daryeelka xanaanada dadka waaweyn, tas-hiilaadka nolosha iyo deegaanka la kaalmeeyey, xarumaha kalkaalinta, iyo bulshooyinka daryeelka xusuusta.

## 18. Maxaan u baahanahay inaan sameeyo si aan u cusboonaysiiyo dheefahayga caafimaad haddii aan haysto daryeel wakhti dheer ah?

- Macluumaadkaaga xiriirka cusboonaysii. Wakiilada idman ayaa ku caawin kara.
- Waxaad mar walba eegtaa waraaqaha dib u cusboonaysiinta ee laguugu soo diraayo boostada. La xiriir maamulaha kiiskaaga haddii aad su'aalo qabto ama aad u baahan tahay in lagaa caawiyo fahamka warqada.

## 19. Maxaa ku dhici kara adeegyadayda daryeelka muddada-dheer cusboonaysiinta kadib?

- Cusbooneysiintaada kadib, mid ka mid ah waxyaabahan ayaa dhici kara:
  - Haddii aad weli u qalanto OHP, OHP-gaagu wuu sii socon doonaa, laakiin waxa laga yaabaa inuu isbeddel kaaga yimaado adeegyada daryeelka muddada-dheer.
  - Haddii aadan u sii qalmin OHP, dheefaha caafimaadkaaga OHP iyo adeegyada daryeelka muddada-dheer way dhammaan doonaan.
- Haddii dheefahaaga la yareeyo ama istaagaan, waxaad codsan kartaa racfaan haddii aadan ku raacsanayn ama u malaynayso in gobolku khalad sameeyay.
- Haddii aad ku nooshahay xarun daryeelka muddada-dheer ama guri xaananada dadka waaweyn, ama aad leedahay daryeel-bixiyeyaasha guriga kula joogo, kala hadal hawl-wadeenka kiiskaaga siyaabaha aad ku sii haysan karto adeegyada aad u baahan tahay.



Shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriis, OHA waxay ku bixin kartaa warbixinta qaabab kale oo dadban sida fasiraadaha, daabicida farta waaweyn, ama farta indhoolayaasha. La xiriir lambarka 503-945-5488 (wicitaanada gudbinta ah oo dhan waa la qabtaa) ama feedback@odhsoha.oregon.gov.